


# Macluumaadka ku saabsan Qiimeynta Dhamaystiran ee Minnesota



## Waa maxay MCAs?

Qiimeynta Dhamaystiran ee Minnesota (MCAs) waa qiimayn ku saabsan akhriska, xisaabta, iyo sayniska, waxaana la sameeyaa sannad kasta. MCAs waxay ku salaysan yihiin Heerarka Waxbarashada ee Minnesota, kaas oo qeexaya waxa ay tahay in ardayda fasal gaar ah ku jiraa ay tahay inay ogaadaan oo ay awoodaan in ay sameeyaan.



## Yaa sameeya MCAs?

Dhammaan ardayda dhigata dugsiyada dadweynaha iyo kuwa charter-ka ee Minnesota ayaa sameeyaan MCAs. Imtixaanada akhriska iyo xisaabta waxaa lagu sameeyaa fasalada 3aad-8aad iyo dugsiga sare (ardayda fasalka 10aad ku jiraa waxay sameeyaan Akhriska MCA, ardayda fasalka 11aadna waxay sameeyaan Xisaabta MCA). MCA-ga sayniska waxaa la siiyaa ardayda ku jirta fasalada 5aad iyo 8-aad iyo fasalka dugsiga sare kuwaas oo ay ku qaataan koorasyo sayniska nololaha ah ama cilmiga bayoolojiga.



## Sidee ayay ardaydu u sameeyaan MCAs?

Ardaydu waxay onlaynka ku qaataan akhriska, xisaabta, iyo sayniska MCAs. Ardayda qaarkood waxaa laga yaabaa inay u qalmaan qalabka imtixaanka ee waraaqaha ayadoo la tixgalinayo qorshahooda shaqsiyadeed ee waxbarashada (IEP) ama qorshaha 504.



## Maxay ardaydu u sameeyaan MCAs?

MCAs waxaa loo adeegsadaa in lagu soo uruuriyo macluumaadka ku saabsan waafajinta manhajka degmooyinka iyo dugsiyada iyo barashada leh heerka waxbarasho ee gobolka. Dugsiyada waxay macluumaadkaas u isticmaalaan hagaajinta qalabka waxbarashada iyo kaalmada waxbarashada. Barayaasha waxay raadiyaan goobaha ay ardaydu ku wanaagsanyihiin si ay u xoojiyaan hababka ay wax ugu baraan xirfadahan. Barayaashu waxaa ay sidoo kale raadinayaan goobaha ay ku horumarin karaan manhajka ku salaysan heerarka iyo waxbarida.



Kordhinta  
saxnaanta  
xogta



Go'aamada  
degmada iyo  
iskuullada ee  
la wargeliyay

## Ka qaybqaadashada MCAs

Ka-qaybgalka Ardayga ee MCAs waa muhiim sababtoo ah waxay fursad siineysaa iskuulkaaga iyo degmadaada si ay u qiimeeyaan manhajkooda iyo barashadooda si loo hubiyo in dhammaan ardayda ay helaan waxbarasho tayo sare leh. Inta badan ee ardaydu ay ka qeyb qaataan, waa inta badan ee xogta ay u saxantahay degmooyinka iyo dugsiyadaba si ay go'aanno xog-ogaal ah uga gaaraan sida loo isticmaalayo lacagta iyo